SOOYAALKII IYO MAANSADII UGAAS CILMI WARFAA
(Cilmi Dheere)

"Ma dinnaahiyaa sida libaax dagi ku liibaanay
Ma diigdiigsadaa waa waxay naga dalgaayeene
Mise wayska daayaa gef waa laga dambeeyaaye"

Allah ha u naxariistee Cilmi Warfaa Rooble oo loo aqoon jiray *Cilmi Dheere* waxa uu ahaa mid ka mida shaqsiyaadkii ugu saamaynta badnaa ee soo maray taariikhda waqooyiga Soomaaliya gaar ahaan gobolka Awdal. Cilmi dheere waxa uu ahaa nin ka tegay raad taariikheed oo illaa maanta laga akhrisan karo nolosha bulshada ku dhaqan inta u dhexaysa deegaanada Herer, Jabuuti, Seylac, Gebiley illaa Jigjiga. Laga soo bilaabo qarnigii 19aad ka hor intii aanay dalalkii gumeysigu la wareegin dhulka Soomaalida illaa badhtimahii qarnigii 20aad Cilmi Dheere waxa uu hormuud ka ahaa isbadelladii masiiriga ahaa ee ku dhacay nolosha bulshadaasi dhinaca siyaasada, juquraafiga, dhaqanka iyo qaabdhismeedka bulshadaba.
Ma jiraan qoraallo rasmi ah oo laga sameeyey taariikhdii Cilmi Warfaa, hase yeeshee, waxa la heli karaa buugaag, suugaan iyo qormooyin kale oo si goosgoos ah loogu xusay sooyaalkiisa. Maqaalkan waxa aynu ku soo ururin doonnaa hadii Eebbe idmo taariikhdii iyo suugaantii uu ka tegay Allah ha u naxariistee Cilmi dheere intii aynu ka gaadhno.

Sida uu Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Nuur ku xusay buuggiisa *Ilbaxnimadii Adal Iiyo Sooyaalkii Soomaaliyeed* Allah ha u naxariistee Cilmi Warfaa Rooble waxa uu ku dhashay magaalada la yidhaahdo Geerisa qiyaastii sanadku markuu ahaa 1853kii. Waxa jira sheekooyin xiise leh oo laga soo weriyo sidii uu ku dhashay Cilmi dheere. Sheekooyinkaas waxa ka mida in aabihii Warfaa Rooble markii uu guursaday hooyada dhashay Cilmi dheere oo magaceeda la odhan jiray Shaqlan Cigaal uu ka bixiyey xoolo tiro badan oo gabbaati ah. Kadibna sida dhaqanka deegaannadaasi yahay waxa uu sugayay in reer gacalkii u soo diiqaan, balse waxa dhacday abaar xun oo xoolihii iyo maalkiiba ka idlaysay reerihii yaallay deegaankii ay inantu ka soo jeedday taas oo sababtay in ay awoodi waayaan in ay diiqo qabanqaabiyaan. Kadibna Warfaa Rooble ayaa loo keenay farriin uga timi reer gacalkii taas oo loogu sheegayo in arrimihii wax iska badeleen oo aan qoyskii gabadhu tahli kari in ay iska dulqaadaan waajibkii dhaqan ee uu ku lahaa. Haseyeeshee waxa ay kala doorransiiyeen in uu duco qaato oo ay Ilaahay s.w uga baryaan in uu siiyo wiil kunciil ah ama in uu sugo inta ay ka soo doogayaan abaarta. Warfaa Rooble waxa uu aqbalay ducadii.

Waxa la sheegay xilligaa Warfaa loogu duceeyey wiilka in gabadhiisu ay uur lahayd muddo kadibna ay umushay wiil, wiilkaas oo loo bixiyey Cilmi ama Kunciil. Arrimaha cajiibka ah ee lagu arkay markii uu dhashay Cilmi dheere waxa ka mida in uu dhashay isaga oo ilko qaba.

Hadii aynu intaas kaga soo gudubno dhalashadiisii. Cilmi dheere waxa uu ahaa nin u dhashay geedlabnimo iyo hanweyni uu da'diisii kaga dhex muuqday. Waxa uu ahaa nin isaga oo yar la dareemay caqli badnidiisa iyo dhiirranaantiisa xad dhaafka ah. Waxa uu ahaa nin dheer oo midab cad oo aad u qurux badan. Waxa uu ahaa nin aad u xoog weyn oo dadka ka quwad badan. Taariikhaha laga soo wariyo xooggiisii waxa ka mida in habeen habeenada ka mida isaga oo jiifa meel gole ah in uu u soo dhacay libaax kadibna inta uu ku kacay in uu libaaxii qoorta qabtay oo isku duubay kadibna ay isla rafteen oo ay dhulka isla galgasheen illaa uu qayliyey Cilmi dheere isagoo leh waar igu soo gaadha bahalka kolkaas ayay dadkii soo gaadheen oo halkaa lagu dilay aarkii.

DAMACII CILMI DHEERE IYO LOOLLANKII UGAASNIMADA

Cilmi dheere waxa uu ahaa nin Ilaahay u dhaliyey caqli, aftahanimo iyo han weynaan. Waxa uu ahaa nin la barbaaray damac kulul oo boqornimo iyo xukun doon ah. Cilmi waxa uu ku taami jiray in uu mar uun gacanta ku dhigo caynaanka guud ee saldanada Ugaasnimada dhulka Awdal taas oo uu u arkayay in uu isagu xaq u lahaa dhaxalkeeda balse laga maroorsaday. Intii uu noolaa waxa uu loollan adag oo xoog iyo xeeladba leh u galay sidii uu ula wareegilahaa xukunka iyo talada Ugaasnimada deegaannada Awdal ee beelaha Gadabuursi.

Xiligii uu barbaarka noqday Cilmi dheere dabayaaqadii qarnigii 19aad waxa talada Ugaasnimada Awdal hayay Ugaas Nuur Ugaas Rooble oo ahaa adeerkii la dhashay aabihii Warfaa Rooble. Ugaas Nuur Ugaas Rooble waxa uu ka mid yahay Ugaasyadii ugu magaca weynaa ee soo maray boqortooyada da'da weyn ee Awdal gaar ahaan beelaha Gadabuursi. Balse Cilmi dheere ayaa isagu ku dooday in uu aabihiis Warfaa Rooble uga xaq lahaa saldanada Ugaasnimada sidaas darteed uu isagu yahay ninka dhaxlaya talada Ugaasnimada.

Si aynu fahanno sababaha dhaliyey muranka iyo doodda dhaxaltooyada Ugaaska aynu waxyar dib ugu laabano qaabkii ay isu dhaxli jireen Ugaasyada beelaha Gadabuursi.

Saldanada Ugaasyada beelaha Gadabuursi oo la aasaasay qarnigii 16aad waxa ay ka koobantahay tiro ahaan 20 Ugaas oo iskusoo dhaxlayay qaab dhalasho ah oo hal qoys ku kooban. Waxa jira xeer ama dastuur gooni ah oo la sameeyey xiligii la aasaasayay saldanada kaas oo qeexaya hanaanka loo marayo dhaxalka Ugaasnimada. Shuruudaha xeerkaasi dhigayo waxa ka mida in Ugaasku marka uu dhinto uu dhaxli doono mid ka mida wiilashiisa oo leh sifooyin cayiman. Sifooyinkaasi waxa kamida in aanay hooyadii ka soo jeedin beelaha Gadabuursi iyo in aanu ahayn wiil dumaal ku dhashay.

Ugaas Rooble I Ugaas Samatar waxa uu dhalay 20 wiil oo uu ka mid yahay Cilmi dheere aabihii Warfaa Rooble. Sadex bahood oo uu walaalihiis ka dumaalay ayaa u kala dhalay caruurtiisa. Markii uu gaboobay Ugaas Rooble I ayaa la isweydiiyey cidda dhaxalkisa yeelan doonta. Kadib markii la isla qiray in aanay dhamaan wiilashiisu buuxinayn shuruudaha dhaxalka ayaa waxa lagu heshiiyey in Ugaaska loo dhiso gabadh dhasha wiilkii talada dhaxlilahaa. Kadibna waxa gabadh looga doonay qoyska Ugaaska beeshe Ciise. Gabadhii waxa ay ku curatay Ugaas Nuur Ugaas Rooble. Markii uu dhashay Ugaas Nuur ayaa waxa geeriyooday aabihii oo ahaa Ugaaskii talada hayay Ugaas Rooble I. Allah ha u naxariistee markii uu Ugaasku dhintay ayay odayaashii beeshu ku heshiiyey in wiilka yar ee Ugaas Nuur uu barbaarintiisa la wareego walaalkiis Warfaa Rooble oo ahaa Cilmi dheere aabihii.

Ugaas Nuur waxa koriyey Warfaa Rooble kaas oo baray aqoon badan, taariikh iyo tababarro kala duwan oo ku saabsan dhaqanka iyo maamulka. Ugaas Nuur waxa uu talada si rasmiya ula wareegay sanadkii 1848kii waxana uu noqday Ugaaskii ugu awoodda iyo taariikhda badnaaa ugaasyadii saldanada Awdal.

Hadaba Cilmi dheere ayaa waxa uu garaadsaday iyada oo uu talada hayo Ugaas Nuur Ugaas Rooble. Haseyeeshee markii uu barbaar noqdayba waxa uu weerar dhinaca afka ah ku bilaabay

Ugaas Nuur Ugaas Rooble. Waxa uu ku dooday in uu aabihii Warfaa Rooble talada uga xaq lahaa islamarkaana uu isagu (Ugaas Nuur) yahay mid boqornimada si qaldan ku helay. Dood kulul iyo hirdan adag oo marba marka ka danbaysa sii xoogaysanayay ayaa ka dhex qarxay Ugaas Nuur iyo Cilmi dheere.

Sidii dhaqanka Soomaalidu ahaa dadkii hore waxa ay ku kala cadgoosan jireen baanaha iyo maansada qaybaheeda kala duwan. Ugaas Nuur Ugaas Rooble waxa uu ahaa gabyaa cabqari ah oo gabayadiisu carriga Soomaalida wada gaadheen. Waxa ay ahaayeen gabayadiisu jaad gooni ah oo aan Somalidu wakhtigaa aqoonin. Sidoo kale Cilmi dheere ayaa isaguna markii uu barbaaray waxa uu noqday gabyaa weyn oo aan waxba ka laallaadin Ugaas Nuur.

Hadaba Ugaas Nuur Ugaas Rooble markii uu barbaarkan dhalinyarada ah ku arkay arrimo uu la yaabay oo ay ka mid yihiin aftahamo, garasho fog, gabayo xeeldheer iyo damac dhiirran oo xukun doon ah ayaa waxa uu mararka qaar isku dayi jiray in uu jirrabo. Sidii dhaqanka Soomaaliduba ahaan jiray ee shaxda dusheeda la isugu baani jiray Ugaasku waxa uu la shax-dhigan jiray Cilmi dheere isaga oo shaxda dusheeda ugu tirinaya tixo kaftan iyo duurxul ah oo uu ku yoolbaadhayo. Cilmina maadaama uu ahaa nin ilaahay hibo u siiyey gabayga gole ka fuulk ah si degdeg ah ayuu ugu hal celin jiray.

Inkasta oo aan la helin cid ururisa gabayadii kaftanka iyo duurxulka ahaa ee dhex maray Ugaas Nuur iyo Cilmi dheere oo ay badankoodu lumeen, hadana waxa jira dhawr tixood oo gaagaaban kuwaas oo aan ka soo qoray buugga *Ilbaxnimadii Adal Iiyo Sooyaalkii Soomaaliyeed* ee uu qoray Eebbe ha u naxariistee Sheekh Cabdiraxmaan Qaaddi. Tixahaas waxa ka mida kuwan soo socda:

Ugaas Nuur:

- Arayoow maroodigu hadduu kaynta alalaayo
- Uu-uuda qaylada rag loo urursho mooyaane
- Eebo uun ninkii ula tagaa waa ardaalnimo,
- Libaax aaladdisii watoo uurka ka higgooday
- Afka gacanta loogama geshoo waa ardaalnimo! …..kanaan degay.

Cilmi Dheere:

- Arayoow maroodigu hadduu kaynta alalaayo
- Uu-uuda qaylada rag loo urursho mooyaanta
- Adiguu ilaah kula yahee waaba ey koraye
- Igu eeg anuun baa ka bixin iligyo dhaadheere…. kanaan degay.

Ugaas Nuur:

- Hal maroodi mayracay libaax maangad ka aroorshay
- Masna xerada loo dhigay malkada loogu maro sheega?

Cilmi Dheere:

- Hal bakayle marayracay atoor maangad ka aroorshay
- Dabagaalle maynuun u yahay lagama maarmaan dheh

Ugaas Nuur: Derbi dhagaxa daar shiidan oo deyran baan ahaye…. kanaan degay

Cilmi Dheere: Aniguna dubbaha lala dhacee daadiyaan ahay… kanaan degay

Ugaas Nuur:

- Badda guuxi gowdaa ka bixi waxa garaacaaya
- Hadaad garato gabay waad taqaan kumana gaadhsiiyo
- Hadii kale garaadlaaweyohow doono garowgaaga.

Sida muuqata gabayadu intan waa ay ka tiro badnaayeen wayna ka dheeraayeen xaga beydadka, balse nasiib darro lama hayo taariihda oo fogeyd darteed. Dadka wakhtigan nool ee gabayada laga soo ururuiyey ayaa noqonaya facii ama jiilkii sadexaad ee ka soo wareegay facii Cilmi dheere iyo Ugaas Nuur. Jawaabtii uu Cilmi dheere ka bixiyey tixda ugu danbaysa illaa hadda lama helin, balse ciddii heli karta ama meel noogu tilmaami karta waxa aan ka codsanaynaa in ay nala soo wadaagto oo ay noogu soo hagaajiso ciwaannada ku lifaaqana qormadan dhamaadkeeda.

Hadaba xilliyadan uu dhallinta yaraa Cilmi dheere waxa uu ahaa nin aan ka fogeyn miiska talada waxana uu ka mid ahaa guddiyada khaaska ah ee Ugaaska. Arrimaha uu Ugaaska kala qayb qaatay waxa ka mid ahaa booqashadii uu magaalada qaahira ee dalka Masar ku tegay Ugaas Nuur Ugaas Rooble sanadkii 1876kii, xilligaas oo dawlada Masar ay la wareegtay gacan ku haynta dhulka Soomaaliyeed oo ay ku jirto magaalada Herer taas oo waftiga Ugaaska iyo dawlada Masar ay ku kala saxeexdeen heshiiskii ogolaanshaha gacan ku haynta iyo maamulka dhulka u dhexeeya Bullaxaar, Saylac iyo Harar. Sidoo kale Cilmi dheere waxa uu hogaaminayay waftigii ka socday saldanada Awdal ee ay dawlada Ingiriisku heshiiska kula saxeexatay badda cas dusheeda sanadkii 1884kii halkaas oo uu matalayay doorka Ugaaska isaga oo ku saxeexay ciwaanka *Amiir Cilmi Warfaa*. Dhacdo kale oo uu Cilmi dheere Ugaas Nuur kala qaybgalay ayaa ahayd munaasabadii ay dawlada Masar iyo Ingiriisku kula kala wareegayeen gacan ku haynta magaalada Herer sanadihii 1885tii halkaas oo isaga iyo Ugaas Nuur ay dawlada Ingiriiska oo uu matalayay Major Hunter iyo dawlada Masar oo uu matalayay Ridwaan Pasha ay u wakiisheen in ay dhisaan imaaraddii Herer iyo ciidamadeedii oo Soomaali u badnaa.

Hadaba sanadahan uu Cilmi dheere hawlahan ka qaybqaatay waxa cirka isku sii shareeray damacii iyo riyadii uu illaa yaraantiisii la soo barbaaray ee ahaa in uu mar uun ku labbisto taajka Ugaasnimada. Waxyaabaha damaciisa kiciyeyna waxa ka mid ahaa dhacdooyinkii siyaasadeed iyo go'aannadii masiirka umadda wax ka bedelay ee uu isagu qalinka ku duugay qaarkoodna talo ku lahaa, quwadihii cusbaa ee soo baxay iyo awooddii siyaasadda caalamka ee dhinaca kale u dheelliday, dawladihii reer yurub ee Geeska Afrika iskusoo fidiyey, aqoontii iyo fahamkiisii ballaadhnaa ee uu arrimaha siyaasadda u lahaa, Ugaas Nuur oo cimrigiisu gebogabo ku dhawaaday iyo arrimo kaloo badan.

Cilmi dheere maadaama uu ka baqayay in uu xukunka ku waayo hanaanka xeerku dhigayo ee dhaxaltooyada, waxa uu samaystay xulafo siyaasadeed oo gudo iyo dibadba leh waxana uu weerar culus ku qaaday Ugaas Nuur laftiisa. Sida uu ku sheegay buuggiisa *Seventeen Trips Through*

Somaliland (Major H.G.C Swayne, 1903), 25kii September sanadkii 1887kii isagoo socdaal ku maraya deegannadaasi ayaa wuxu sheegay in ay ku hakadeen meesha la yidhaahdo *Satawa* halkaas oo uu kula kulmay Ugaas Nuur Ugaas Rooble oo wata ciidan ka kooban afartan nin iyo wiil uu dhalay. Waxa uu sheegay *Swayne* in xiligaasi uu aad u xumaa xidhiidhkii u dhexeeyey Ugaas Nuur iyo dawladii ingiriiska oo magaalada Saylac fadhiday taas oo sababtay in kalabadh xukunkii Ugaaska uu la wareegay Cilmi dheere oo saldhig ka dhigtay magaalada Saylac. Sababta ay dawlada ingiriiska iyo Ugaasku ku colloobeen waxa uu *Swayne* ku sheegay in Ugaasku uu qabtay oo uu xidhay nin talyaani ah oo dhulka sahaminayay islamarkaana uu madax furasho ka qaatay taas oo ay dawlada Talyaanigu ingiriiska kaga dacwootay sababtaasna ay ku kala fogaadeen Ugaas Nuur iyo dawladii ingiriisku.
Swayne waxa uu sheegay in intii uu ku sugnaa isla goobtaasi ay soo gaadhay warqad af Carabi ku qoran oo uu soo diray Cilmi dheere taas oo uu kaga dalbanayay in uu gacan ka siiyo sidii uu weerar ugu qaadilahaa Ugaas Nuur Ugaas Rooble hadii kalese uu u soo diro hub qoryo iyo rasaas ah.

Gabayadii uu Cilmi dheere tiriyey xiliyadaas ee uu ku weerarayay Ugaas Nuur waxa ka mid ahaa gabaygan soo socda ee uu ku sheegayo in uu faraskiisii ka qaatay isagana uu ka tuuray cimaamaddii Ugaasnimada.

- Haddii anan qudhayda u labayn xamar ma qaadeene
- Qolqolkayga kuma soo xidheen quruxdii miisaane
- Qaabuuliduu cuni jiroo quusay odaygiiye
- Qoto uma hayaameen hadduu qiil u noolyahaye
- Kolka fule qayuursadaan sidii qamar iftiimaaye
- Qublo inaan ka dhigay wuu ogyahay qaranka iiddoore.

Markale ayaa waxa dhacday in loo kala ergoodo Ugaas Nuur iyo Cilmi dheere. Ergo ka socota beesha Aadan Yoonis oo aanan weli helin magacyada odayaashii xubnaha ka ahaa ayaa bilowday ol'ole dhexdhexaadin ah oo lagu heshiisiinayo Ugaasyada. Balse sida gabaygan hoose ka muuqata Cilmi dheere uma cuntamin arrintaasi waxana uu digniin iyo canaan huwiyey odaygii hogaaminayay ergada. Cilmi dheere waxa uu tiriyey gabaygan hoose oo laga yaabo in ay wax ka maqanyihiin ama macluumaad kale ka dhimanyihiin.

- Indho darane boqor iinle waa laga ajoodaaye
- Ayaan darane ergaduu wadaan aayatiin dhaline
- Arrin darane goortuu boqruu eeday Samarroone
- Nin engagay arwaaxuna ka tegay oo ay ka aguugtay
- Haddaad idam Ilaah kuma jirtee mid u abuurayso
- Maal aan irmaanayn haddaad ibo u yeelayso
- Iyo inaad aqiibo xun u dhigi ubadka reer Rooble
- Arrin adiga mooyee haddaan uunka kale haynin
- Bal aan eegno xaajadu halkay ku intihoonayso.

Ugaas Nuur waxa uu dhalay 12 wiil, Cilmi dheerena wakhtigaasi waxa uu lahaa hal wiil. Waxa la sheegaa in dadka qaar ku yidhaahdeen ninkaasi waa kaa wiilal badanyahay hadii uu fursad kugu helo wuu ku soo weerari doonaaye sideed iskaga celin doontaa? Waxa uu Cilmi dheere ku jawaabay gabaygan hoose;

- Labiyo toban nin oo labo la dilay labana leexaysay
- Oo labana laaf iyo lug jaban waabka kula luudday
- Oo labo laxaad li'i indhaha labo legdaynayso
- Oo labana oday waa lucfiye loolka geli weydey
- Laayaan wixii laga dayaa laba nin sow maaha.

CALEEMASAARKII UGAAS CILMI DHEERE

Allaha ha u naxariistee Ugaas Nuur Ugaas Rooble waxa uu geeriyooday sanadku markuu ahaa 1903dii waxana lagu aasay meesha la yidhaahdo Dirri ee ku taalla deegaanka Harawo. Geeridii Ugaas Nuur kadib waxa uu loollan cusubi ka dhex bilaabmay wiilashii ilma Ugaas Nuur iyo Cilmi dheere. Ugaas Rooble II Ugaas Nuur ayaa dhaxalkii Ugaasnimada la wareegay balse waxa uu khilaaf adagi kala dhexgalay isaga iyo wakiilladii ingiriiska ee Saylac iyo Berbera fadhiyay. Khilaaf iyo muran dheer kadib Ugaas Rooble II waxa uu xidhiidhka u jaray dawladii Ingiriiska isaga u wareegay dhinaca Ethiopia islamarkaana xidhiidh cusub oo siyaasadeed la samaystay dawladii xabashida. Halkaasna waxa ku soo afjarmay xidhiidhkii dawlada ingiriiska iyo saldanadii Gadabuursi.

Sanadku markii uu ahaa 1917kii ayay dawlada ingiriisku qabanqaabisay in Ugaasnimo buuxda loo caleemo saaro Cilmi Warfaa Rooble. Magaalada Saylac ayaa lagu caleemo saaray waxana uu sidaasi ku noqday Ugaaskii 16aad ee saldanadii Awdal. Ugaas Cilmi markii uu ku guulaystay hadafkiisii ahaa xidhashada duubka Ugaasnimada waxa uu tiriyey gabaygan kooban ee uu kaga hadlayo waxa uu ka yeeli doono asxaabtiisii kala duwanayd ee intii uu loollanka ku jiray ninba kaalin gaara ka ciyaaray boqornimadiisa.

- Nin i ladhay, nin igu laagsadiyo nin i lamaaneeyey
- Iyo nimaan lurkaygana jeclayn libinna ii diiddan
- Iyo nimuu lihiin dhigay halkii rag isu laacaayay
- Intaasuu isugu laaqanyahay loolkii ii xigaye
- Nin walow lufkaad igu lahayd waa hadhow lulo.

Sanadihii 1920kii ayaa ninkii ingiriiska wakiilka u ahaa ee la odhan jiray *Major H. Rayne* waxa u buuggiisa *Sun, Sand and Somals* ku qoray in uu magaalada Saylac kula kulmay Ugaas Cilmi dheere oo wata ciidan tiro badan. Waxa uu sheegay in markii uu goobta yimi ay ciidankii Cilmi dheere bilaabeen in ay dabaaldeg u sameeyaan Ugaaska iyo wakiilka ingiriiska iyaga oo qaadaya gabayo iyo heeso kala duwan oo ay si dadban ugula hadlayaan wakiilka ingiriiska. Waxa uu sheegay in

heesaha qaarkood loo turjumay oo lahaayeen; *waxa aanu nahay kuwii xabashidu dhulkooda ku soo duushay ee ay xoolohooda dhacday*.
Sawirkan hoose waxa goobtii ciyaartu ka socotay ka qaaday *Major H. Rayne.*

Hadaba Ugaas Cilmi dheere muddadii uu Ugaaska ahaa oo ahayd 17 sanadood waxa dhacay isbadello badan oo dhinaca siyaasada iyo bulshada ah. Dhinca bulshada marka aynu eegno dabcan maamulkii Ugaas Cilmi dheere intii uu shaqaynayay ma khilaaf iyo mucaarad la'ayn. Saldanadii oo labo u kala jabtay iyo shacabkii kala qaybsamay ee labada Ugaas kala raacay waxa ay sababtay dhib badan iyo in kacdoon cusubi ka dhex bilaabmo beelihii kala duwanaa ee saldanadu u talin jirtay.

Waxa jirtay in maamulki Ugaas Cilmi dheere mucaarado badani kaga kaceen gudaha beelwaynta Gadabuursi iyada oo qaar ka mida beeluhu ay ku haloosiyeen in gebi ahaanba saldanada laga wareejiyo beesha reer Ugaas ee talada soo haysay muddada afarta qarni ka badan islamarkaana loo dhiibo beelaha kale ee Samarroon. Arrintaasi waxa ka dhashay gabayo iyo mansooyin kala

duwan oo la isu tiriyey intii loollankaasi socday. Halkan waxa aynu ku soo qaadan doonnaa gabayo dhawr ah oo ka mida kuwii dhex maray Cilmi dheere iyo shaqsiyaadkii hormuudka ka ahaa kacdoonnadii isaga ka hor yimid.

Ugaas Cilmi Dheere (AUN) ayaa maalin maalmaha ka mida waxa uu la kulmay nin la odhan jiray Hufane Qaye oo lagu naanaysi jiray Laangadhe (dadka qaarna faarax bay ku sheegaane), ninkaasi oo dillaal ka ahaa saylada xoolaha ee magaalada Saylac ayaa waxa uu Ugaas Cilmi kula taliyay in uu dillaalnimada iska dhaafo oo uu isagu ka shaqaalaysiin doono dekeda. Hufane waa uu aqbalay shaqadaasi. Cilmi dheere waxa uu waraaqihii shaqaalaysiinta u soo saaray Hufane isaga oo ku qoray qaybta dhoofinta hargaha.

Ninkii Hufane markii uu muddo shaqaynayay ee uu xoogaa yara ladnaaday ayuu xasuusan waayay Ugaaskii shaqada ku qoray. Markii uu Ugaas Cilmi arkay in ninkii uu shaqo geeyey salaantaba kala baydhayo ayuu maalin maalmaha ka mida u yeedhay waxana uu la dhigtay shax. Markii ay shaxdii u fadhiisteen ayuu Ugaas Cilmi shaxdii ku bilaabay:

- Hufanoow lugtaad weecin eed wiliq ka siinayso
- Waran kaagamuu dhicin adoo waalan dirirtiiye
- Waxa kaa wedderay waa tolkaa wacad furkiisiiye--------- kanaan degay.

Hufane waxa uu ahaa nin gabya waxana uu ugu jawaabay:

- Dabadaaba reeraan la arag meelay degayaane
- Odayahaw maxaad ii duldhigi wacadka duugoobay-------kanaan degay.

Cilmi aaya kusoo noqday:

- Waayadan ninkaan boqor lahayn wuu bakhtiyayaaye
- Baallahayga uun maad ka guran bawladdiyo saaqa-------kanaan degay.

Hufane ayaa ku jawaabay:

- Waxaad aniga ii hidin lahayd maad hurreba siisid (hurre waa Cilmi dheere wiilkiisa)

Cilmi dheere:

- Isha naban awaaraha haddaan ciidda kaga aaso
- Hadhow bay u wada ooyayaan ooryuhuu qabaye
- Alla odayga yaa iga qabsada oofahaa gu’iye

Hufane ayaa ku jawaabay:

- Cilmiyoow ninkii kaa qabroon qolana kaa liidan
- Een cidi qisaasayn hadduu qariyo ruuxaaga
- Ma qaraaxad baa lagu dayaa qaawi baad tahaye

Gabayadu intan waa ay ka dhaadheeraayeen wayna ka badnaayeen balse weli nooma suuragalin in aan wada helno. Gabaygan soo socda ayaa ka mida gabayada kala dhiman ee uu Cilmi dheere Hufane u tiriyey.

- Hufanow irdaha muuse deri iyo idilka reer yoonis
- Awow iyo awow iyo intaan odayo soo sheegto
- Waa wada Ugaas iyo kuwuu ubaxu saarraaye
- Adiguna irdaha yoonis iyo oodan baad tahaye
- Ifka daaye illaa aakhiraan kuu Ugaas ahaye

Qaar ka mida beelihii kacdoonka wadey ee ku talinayay in gebi ahaanba xididada loo siibo saldanada oo laga wareejiyo beesha reer Ugaas ayaa bilaabay baanisaha iyo dagaalka maansada. Allah ha u naxariistee Aw Aadan Badow oo ka soo jeeday beesha Jibriil Yoonis ayaa diray dhambaal qaylo dhaan ah. Waxa uu u baaqayaa Fariid Dhabbi haye oo isaguna ka soo jeeday beesha Aadan Yoonis oo gabyaa weyn ahaa. Dhambaalkii Aw Aadan ayaa u dhignaa sidan;

- Fariidow Ku tebay oo Ku tebay talana Eebbaa leh
- Tumaati iyo riddaba laysku tuur tudhid la'aaneede
- Talyankiyo Ugaaskay sidii taladu joogtaaye
- Toban baan Ku eegiye waxaa tarise mooyaane.

Fariid Dhabbihaye ayaa soo tiriyey gabay jawaab ah oo uu ku carinayo beelaha Yoonis muuse isaga oo raba in ay kacaan oo ay saldanada ka tuuraan beesha reer Ugaas. Waxa uu yidhi Allah ha u naxariistee Fariid:

- Aw Aadanow kayn cidlo ah kama cabsoonayne
- Car layguma yidhaa duul haddaan caabudlow qabo eh
- Lag carruura caadlaha tashiyo kuman cayaaraaya
- Iyo kuman cidduun noo jiroo cadaw ka eegaaya
- Iyo kuman cilmiga noo dhigtoo caalim iyo sheekh leh
- Iyo kuman cidhiidhiga fardaha col ula taawooda
- Iyo kuman martida caawiyoo lagu carraabaayo
- Iyo kuman cawaan sheegannaye bagay cawaynaaya
- Iyo kuman cibaarada duleed noo cunsura sheega
- Ragga faro cammuuddaa noqdee camalki naageeyey
- Ciyaar iyo durduro reer Ugaas waw cidhbinayeene
- Gobanimo hadii loo cartamay cune ammaankiiye
- Cosob waxa ka roon doog yaroo caafimaad qaba eh
- Caynaano male yoonis iyo curadadiisiiye
- Ha ii celinin duulkaa cashiyey caafimaad malehe.

Allah ha u naxariistee Ugaas Cilmi dheere markii uu gabayadaas maqlay ayuu ka dhiidhiyey. Waxa uuu tiriyey gabayga caanka ah ee **Dhego Taag**. Waa gabay isugu jira gooddi, carasho iyo hanjabaad uu ugu quus goynayo beelihii damacu ka galay saldanada.

Waxa uu yidhi:

- Dhudda gabay haday faaraxoow dhiifi igu qaaddo
- Dhayal uma hadlee maalintaan dhan u kaxaynaayo
- Sida duul Cilmiga loo dhigaan ugu dhawaaqaaye
- Maantana dhambaal baa ka yimi nimaan wax dhaadayne
- Dhaafi maayo oo waxan la dhici dhagaxyo waaweyne
- Kolka aan dhawaaqaa dadkuba dhegaha taagaaye

- Aadanow dharkaynkiyo carmadu dhamac ma yeeshaane
- Dhiri waxay magooshaa kolkuu dhibic ku hooraaye
- Waxa maalka laga soo dhigaa dhaqayo xoolaade
- Awrkii dhufaan ahi ma karo inuu dhal daadshaaye
- Dhedigoodka waa shay la mida hawlina u dheere
- Dhulka rayska hoos uma geshaan dhediyo ceeryaane
- Caanaha biyaha lagu dhafaa malaha dheecaane
- Dhiddinka iyo carmadu geed kalay dhinaca saaraane
- Dhuurtiyo alaaladu biyaha kama dhaqaaqaane
- Dhaxani xaaxda kaagama kacdoo waa dhawaaq baxaye
- Dhudhumada ninkii laga jabshaan orodka dheerayne
- Afartiina dhaadheer kuwii dhuuxay baan nahaye
- Dhawaan la ima keenine hadaan dhalashaday sheegto
- Dhuuxii cirweyn baan ahiyo sooma dhaaftada eh
- Waxan ahay shabeel dhiidhiyay iyo dhagarqabow aare
- Waxan ahay dhadhaab oodan oon cidina dhaafayne
- Waxan ahay nin meeshuu wax dhigo loo dhawaan karine
- Dhawaaqay markii ay maqlaan ayay dhiraha jiidhaane
- Wixii dhaaxa laysaga samraad dhiil u cugateene
- Hadaan boqorka meeshii la dhigay cidi u dhaafaynin
- Aseen dhuubka laga qaadi karin dhamacda reer Rooble
- Oon lana dhacayn hadalku sow dheelalow maaha.

Ugaas Cilmi dheere waa uu ku guulaystay riyadiisii boqornimada. Waxa kale oo u ku guulaystay in uu duubka Ugaasnimadaba ka difaacdo ilma adeerradii oo ay isku hal guri ka soo wada jeedaan. Si guudna waxa uu ugu guulaystay in uu saldanada ka difaaco beelihii kale ee damacu ka galay. Sanadku markuu ahaa 1934kii ayay soo gebogabowday noloshii Allah ha u naxariistee Ugaas Cilmi Dheere. Isaga oo ay da’diisu tahay 81jir ayuu si caadiya ugu geeriyooday magaalada Borame halkaas oo lagu aasay.

DHAXALKII UGAAS CILMI DHEERE

Allah ha u naxariisto Ugaas Cilmi Warfaa Ugaas Rooble waxa uu dunida kaga tegay raad weyn oo illaa maanta lagu xasuusto. Dadkii la kulmay Cilmi dheere waxa ay ku sifeeyeen in uu ahaa nin garaadkiisu aad uga sarreeyey dadkii xilligiisa noolaa islamarkaana faham durugsan u lahaa waaqica siyaasiga ah ee dunida iyo kooskaba ka jiray xilligaa. Waxa uu ahaa siyaasi xeeldheer oo aanay jirin cid siyaasad kula loollanta xilligiisii. Duubka Ugaasnimada waxa uu ku hantiyey khiddooyin ba'an iyo dabinno siyaasadeed oo uu si xariiftinimo leh ugu daadiyey Ugaasyadii talada kala dhaxlay ee ay ka mid ahaayeen Ugaas Nuur Ugaas Rooble I, Ugaas Rooble II Ugaas Nuur iyo Ugaas Dooddi Ugaas Rooble II. isaga oo dhinaca kale dawladii ingiriiska ka kasbaday taageero siyaasadeed iyo mid awoodeedba si uu qorshihiisa ugu meelmariyo.

Sanadku markuu ahaa 1884kii Ugaas Cilmi dheere isaga oo ka wakiil ah Ugaas Nuur Ugaas Rooble islamarkaana hogaaminaya wafti ka kooban 11 oday waxa uu heshiis adag oo xaddaarad iyo aqoon badani ka muuqato la galay dawladii ingiriiska. Heshiiskaasi oo kamida kuwii ugu horreeyey ee dawlada ingiriisku la gasho beelaha Soomaalida ajendaha ay la tageen Cilmi dheere iyo waftigiisu waxa kow ka ahaa qodobka ah in dhulka Awdal ee ay caasimadiisu tahay magaalada Saylac uu noqdo dhul ay dawlada ingiriisku dusha uun ka ilaaliso (protectorate) balse aanu noqon karin dhul la gumaysto (colony) sida ka dhacday dalal badan oo afrikaan ah.

Sheekh Cabdiraxmaan Qaaddi buuggiisa *Ilbaxnimadii Awdal iyo Sooyaalkii Soomaaliyeed* waxa uu ku qoray:

"*Waxa aan la kulmay Ugaas Cilmi dheere waxana aan weydiiyey sababta ku kelliftay in ay dawlada ingiriiska heshiis la galaan. Waxa uu iigu jawaabay si kale oo aan yeelno ayaan garanweyney maadaama wakhtigaasi ay dhamaan beelaha Soomaalidu isdilayeen oo beeliba beesha kale ay baabiinaysay arrintaasi oo ka dhalatay jaahilnimo dadka haysay oo ay dad badan oo Soomaaliyeed ku naf waayeen*".

Heshiiskaasi waxa uu noqday mid taariikhiya oo gebi ahaanba bedelay nolosha bulshadii dhulka Awdal kaas oo ay saamayntiisu taagantahay ilaa maanta.

Markii uu talada Ugaasnimada qabtay Ugaas Cilmi dheere waxa uu ka soo guuray degmada Saylac oo xilligaasi ahayd degmada keliya iyo caasimadda dhulka Awdal waxana uu u soo guuray magaalada jaarra horato. Muddo sadex sano ah kadib Ugaas Cilmi waxa uu dawlada ingiriiska ka dalbaday in ay degmo cusub ka yagleesho meesha la dhaho Borame dawlada ingiriiskuna waa ay fulisay qorshahaasi. Ninkii la odhan jiray major Hunter ee dawlada ingiriiska wakiilka u ahaa, Ugaas Cilmi iyo madax kale oo labada dhinacba ka socotay ayaa waxa ay dhagax dhigeen degmadii cusbayd ee Borame bilowgii sanadkii 1920kii. Hal sano kadibna waxa dhamaaday dhismihii magaalada.

Inkasta oo Ugaas Cilmi dheere uu isagu udub dhexaad u ahaa jaangoynta heshiiskii muujinayay qaabka ay tahay in dawlada ingiriisku ula dhaqanto shacabka reer Awdal, hadana dhinaca kale waxa uu sabab u noqday burburkii talada saldanadii Awdal ee soo bilaabantay qarnigii 16aad.

Cilmi dheere waxa uu ka tegay dhulkii la odhan jiray Awdal oo u qaybsan labo saldanadood oo itaal daran kuna kala hoos jira Ethiopia iyo dawladii ingiriiska. Waxa kale oo uu ka tegay shacabkii reer Awdal oo gebi ahaanba kala daatay, qayb isaga iyo xukunkiisa taageersan, qayb Ugaas Rooble II iyo willkiisii Ugaas Dooddi raacsan oo ay xabashidu xukunto iyo qayb saldanada reer Ugaas oo dhanba ka soo hor jeedda.

Ugaas Cilmi dheere waxa uu ahaa nin ku caan baxay mu'aamaradaha siyaasadeed ee xeesha dheer kaas oo qof kata oo ay is qabtaan siyaasad kaga takhalusa. Sanadihii 1887dii waxa uu iska hor keenay Ugaas Nuur Ugaas Rooble I iyo dawladii ingiriiska oo markaasi degenayd degmada Saylac.

Sanadihii 1915kii waxa uu duufaanno ka dhex kiciyey wakiilkii ingiriiska Ser-Arshal ee Berbera joogay oo ay isaga aad u saaxiib ahaayeen iyo Ugaas Rooble II Ugaas Nuur taas oo sabab u noqotay in isaga loo caleemasaaro Ugaasnimada halka Ugaaskii dhaxalka lahaana uu cadhooday una wareegay dhinaca Ethiopia. Waana markii ugu horraysay ee beelaha Gadabuursi ay yeeshaan labo boqor.

Cilmi dheere intaas oo keliya kagama hadhin Ugaas Rooble II, balse waxa uu ku qaaday dagaal afeed aad u kulul. Waxa jirta dhacdo xanuun badnayd oo ka dhacday deegaanka Harawo wakhti ku siman 1920-25kii. Dhacdadaas oo hadii aan soo koobno ahayd in shacabkii deegaankaasi ay diiddeen in ay maamulkii xabashida siiyaan wax cashuur ama gibir sanadeed ah. Kadibna dawladii xabashida ayaa ciidamo u soo dirtay deegaankaasi si ay cashuurta xoog ugaga soo qaadaan. Kadib waxa dhacday in ciidankii ay xasuuq ba'an u geystaan shacabkii halkaasi ku noolaa. Wakhtiga xabashidu xasuuqan geysanaysay Ugaas Rooble Ugaas Nuur waxa uu xulafo siyaasadeed la lahaa dawlada xabashida waxana uu ku sugnaa magaalada Herer. Ragga ay xabashidu xasuuqday oo culimo iyo haldoor miisaan lehi ku jireen ayaa waxa ay badankoodu ka soo jeedeen beesha Reer Maxamuud yoonis ee ka tirsan qabiilka Jibriil Yoonis.

Hadaba Ugaas Cilmi dheere markii uu gaadhay warkii dhiillada lahaa ee dadka la xasuuqay ayaa waxa halkaasi uga muuqatay fursad siyaasadeed. Waxa uu eeddii dusha ka saaray Ugaas Rooble waxana uu ku eedeeyey in uu isagu Herer ka soo diray oo uu adeegsaday ciidamadii xasuuqa geystay islamarkaana uu rabo in uu dadka qasab ku maamulo. Gabaygan soo socda ayuu Cilmi dheere ka tiriyey dhacdadaasi:

- Soddon alif raggaa tiro noqdee samay adayg sheegtay
- Ee dharaarba sumalkii u kaca laga sadqaynaayo
- Maxamuudna saakaa la jaray seedda boqontiiye
- Saratoosiyaa Magan ku cunay sabada ceelkiiye
- Sarsarkii Ibraahiin fadhiyey waa siraad dama'he

- Soojeedihii baa ka tegay sikhigii gaabnaaye
- Samrimaayo Aw Aadan iyo subucyadisiiye
- Sallida qaawan goortuu arkuu ciil la selelaaye
- Simbiidhadu mar uun bay kacdaa qodax sarmaaneede
- Boqornimo haddaan loo saldhigin mooyi say noqone
- Seef iyo sarraaf laguma helo sadiyo liibaane
- Sasabaa tolkaa lagu wadaa suuldhaw iyo xeele
- Bal aan sugo sifaalahan Ilaah wuxu ku suureeyo.

F.G: gabaygan waxa ka maqan illaa 7 beyd.

Sanadihii 1927 illaa 1930kii waxa isu soo dhawaaday dawlada ingiriiska oo uu wakiil u *ahaa Major Rayne* iyo Ugaas Rooble II oo uu la socdo wiilkiisii Ugaas Dooddi kuwaas oo ku kulmay magaalada Borame. Waxa ay isku afgarteen in wiilka uu Ugaasku dhalay ee la yidhaahdo Dooddi maamulka degmada Borame laga siiyo kursi. Waa maalintii ay magaalada Boorame isku arkeen sadex Ugaas oo u taliya hal beel. Waxyar kadib ayaa waxa dawlada ingiriisku ay bedeshay wakiilkeedii waxana ay ku soo bedeshay nin la yidhaahdo *Major Walsh.*

Ugaas Cilmi dheere waxa uu markale duufaanno ka dhex kiciyey *Major Walsh* iyo Ugaas Dooddi taas oo sababtay in ay magaalada Borame iskaga baxaan labadii Ugaas ee Dooddi iyo aabihii iyaga oo si rasmiya isugu dhiibay dawlada xabashida halkaasna lagu soo dhaweeyey. Inyar kadibna waxa Ethiopia ku soo duushay dawlada talyaaniga 1934kii. Isla sanadkanna waxa geeriyooday Ugaas Cilmi Warfaa Ugaas Rooble waana markii ugu danbaysay ee saldanadii reer Ugaas xukunkeedu ka shaqeeyo dhulkii Awdal taas oo illaa maanta oo aynu ku jirno 2023 magaceeda oo keliyi sii jiro.

Cilmi dheere waxa uu ka tegay gabayo badan oo murti, dhaadasho iyo gooddi isugu jira balse nasiib darro gabayadiisii waxa ay noqdeen wax lumay oo aan la kaydin iyo wax qaybo yaryar oo goosgoos ah uun laga helay. Gabayadaasi waxa ka mida gabaygan oo aanu ka helnay beydadkan:

- Haddaad weydo haadhaha gammaan mid ad ka heensayso
- Magaan hirifku kaagama daroo waad ku hoyataaye
- Haddaad weydo gabadh haybadloo hilibku maansheeyey
- Habaasweyntu kaagama dartoo waad ku hoyataaye
- Haddaad weydo geel hodan ahoo lagu harraad beelo
- Hasha keliyi kaagama dartoo waad ku hoyataaye
- Haddaad weydo wiil hanad ahoo hadiyad kuu keena
- Hebeloowdu kaagama dartoo waad ku hoyataa.

Halkan waxa aan uga mahadcelinayaa walaalkay **Abwaan Cabdiraxmaan Dayib Cumar (Kaalmeeye)** oo isagu soo ururiyey intooda badan gabayada aan halkan ku qoray. Waxa kale oo aan u mahadnaqayaa **Tawakal beleloo Ismaaciil** oo aan ka helay gabayga ‘soddon alif’

Tixraac

1. Ilbaxnimadii Adal iyo Sooyaalkii Soomaaliyeed, Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Nuur, 1992.
2. Seventeen Trips Through Somaliland, Major H.G.C Swayne, 1903.
3. *Sun, Sand and Somals*, Major H. Rayne, 1921.
4. Hodan Nuur Faahiye (facebook)

Qore: Xamse Daahir Cusmaan, January 2023, Jigjiga, Ethioipia.

Email: sharaxmwa@gmail.com/facebook/waaberi_Dahir